



DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam 18 ee 14/12/2000

Disember 17, 2000

Kuna saabsan sharciga Hay'adda dayactirka horumarinta, jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha (Puntland Highway Authority)

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY Axdiga Dawladda Puntland,

MARKUU TIXGELIYEY Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda summadeedu tahay GW/80/2000, taariikhdeedunta tahay Garoowe 13/12/2000,

WUXUU SOO SAARAY

Qaanuunka soo socda:

Qodobka 1<sup>aad</sup>

Qaanuunkaan Hay'adda Dayactirka, Horumarinta Jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha (Puntland Highway Authority) waa la ansixiyey.

Qodobka 2<sup>aad</sup>

Saddex nuqul oo qaanuunkaan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa Asal (Original), waxaana lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul, kan saddexaadna waxaa lagu kaydinaayaa lagana faafinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda hal nuqul.

Qodobka 3<sup>aad</sup>

Qaanuunkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxiiso, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda







**Sharci Lam -----**

**Garowe, -----**

**Madaxweynaha D/Goboleedka Puntland ee Soomaaliya,**

**Isagoo fulinaya** awoodihiisa ku cad qodobka 13.2 ee axdiga D/goboleedka Puntland ee la xiriira magacaabidda hay'adaha, si la socota baahida D/goboleedka iyo qodobka 17.2 ee ku saabsan hay'adaha madaxa-bannaan.

**Markuu arkay** xeerka Madaxweyne Lam. MW/DPS/008/99 ee 23.02.1999 kuna saabsan dib-ustaynta hay'adda jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha (NESHA)-2/2000 ee 23.01.2000 laguna kala saaray guddiga hay'adda (BOD) iyo hay'adda fulinta

**Markuu arkay** warqadda ansixinta Golaha Wakiilada ee summaddeedu tahay GW/80/2000 ee 13.12.2000

Wuxuu xeeriyey sharciga hay'adda dayactirka, horumarinta, jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha ee Puntland (Puntland Highway Authority)

**Qodobka 1<sup>aad</sup>  
Macnayn**

- 1.1 D/goboleedka waxaa loo la jeedaa D/goboleedka Puntland ee soomaaliya
- 1.2 Dowlad waxaa loo la jeedaa dowladda Puntland
- 1.3 Puntland Highway Authority waxaa loola jeedaa hay'adda dayactirka, horumarinta, jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha ee Puntland
- 1.4 Xeer waxaa loo la jeedaa xeerka Madaxweyne
- 1.5 Guddi waxaa loo la jeedaa guddiga sare ee hay'adda (BOD)
- 1.6 Guddoomiyaha hay'adda fulinta waxaa loo la jeedaa guddoomiyaha hay'adda fulinta ee Puntland Highway Authority C.E.O
- 1.7 Xeer Madaxweyne waxaa loo la jeedaa xeer uu soo saaray Madaxweynaha D/goboleedka
- 1.8 Mas'uuliinta fulinta waxaa loo la jeedaa agaasimayaasha iyo agaasime-xigeenada hay'adda fulinta

## **Qodobka 2<sup>aad</sup> Meeqaam**

- 2.1 Puntland Highway Authority waa ha'ad Madax-bannaan oo leh shaqsiyad qaanuuni ah waxaana lagu dhaqayaa xeerkan iyo xeerarka hay'adaha madaxa-bannaan ee aan ka hor imanayn axdiga Dowladda Puntland
- 2.2 Magaca hay'adda NESHA waxaa lagu badelay hay'adda dayactirka, horumarinta, jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha (Puntland Highway Authority)

## **Qodobka 3<sup>aad</sup> Mas'uuliyad**

- 3.1 Puntland Highway Authority iyadoo mataleysa qaybaha gaarka ah (private) iyo kuwa caamka ah (public) ee D/goobleedka Puntland ee Soomaaliya waxay u idman tahay mas'uuliyadda dayactirka, horumarinta iyo maamulka mashaariicda jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha

## **Qodobka 4<sup>aad</sup> Ujeeddooyin**

- 4.1 Ujeeddooyinka Puntland Highway Authority waa kuwa soo socda: -

- Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyada hawl-gal ee muddada dhow, dhexe iyo fog
- Ku dhaqanka qaab-dhismeedka sugan, maamul karti leh iyo nidaam xisaabeed oo cad si loogaaro jiritaanka waara ee hay'adda (sustainability)
- La-socodka xaaladda ay kaabayaashu ku sugan yihiin si looga hortago wixii dhibaato dabiici ah ama ah dayac dadka ka yimaada
- La-shaqaynta deeq-bixiyaasha, xafiisyada hindisaadda, hay'adaha caalamiga ah iwm kuna lug leh hawlaha hay'adda
- U-abuuridda iyo u tababaridda farsamo-yaqaanno iyo shaqaale hawlaha dayactirka joogtada ah
- Kor-u-qaadidda wacyi-gelinta bulshada kuna aaddan ahmiyadda hawlaha Puntland Highway Authority
- Diyaarinta iyo fulinta siyaasadda D/goboleedka Puntland ee la xiriirta mashaariicda jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha
- Diyaarinta iyo fulinta mashaariic kaabayaal cusub, iyadoo lagu salaynayo mudnaanshaha bulshadeed iyo dhaqaale
- Soo-jiidashada maal-gelinta iyo kaalmada farsamo ee looga baahan yahay barnaamijyada hay'adda
- Baadi-goobka ilo dakhli oo kor u qaada awoodda maaliyadeed ee hay'adda si kor loogu qaado isku-filnaanshaha maaliyadeed (financial sustainability)
- Diyaarinta qorshaha isku-xirka guud ee jidadka (General road network)
- Ilaalinta qandaraasyada ay fuliyaan qandaraasleyda waddaniga ah, kuwa ajnebiga ah iyo kuwa isku dhafka ah

- Ku-talo-galka kaalmada farsamo ee la xirirta dhisidda ururrada hay'adda daneeya tiirkana u ah (stakeholders)
- Xoojinta awoodda qandaraasleyda waddaniga ah, iyadoo loo fidinayo kaalmada farsamo ee loo baahan yahay
- Xoojinta iyo sare-u-qaadidda awoodda xafiisyada hindisaadda ee waddaniga ah
- Ku-wareejinta maamullada degaamada xilalka jidadka magaalooyinka iyo miyiga markii ay adeegyada Puntland si dhammaystiran u gaaraan heer gobol iyo heer degmo
- Soo-jiidashada iyo kasbashada kalsoonida deeq-bixiyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah si ay u taageeraan hawlaha iyo barnaamijyada Puntland Highway Authority
- Abuuridda jawi adeegsatada jidadka (Road Users) ku dhiiri geliya taageeridda hawlaha Puntland Highway Authority

4.2 Meelmarinta ujeedooyinka kor ku cad ee la toogeystey waxaa loo fulinnayaa, si marxaladaysan, iyadoo lala saan qaadayo awoodda maaliyadeed iyo tan dadeed laguna bilaabay 6<sup>da</sup> ujeedo ee u horreeya

### **Qodobka 5<sup>aad</sup> Istaraatejiyadda Hawl-Fulineed**

Istaraatiijiyadda hawl-fulineed ee Puntland Highway Authority waa: -

- Puntland Highway Authority waa hantiile (loo shaqeeye) markii loo fiiriyo mashaariicda jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha
- Puntland Highway Authority, ilaalinta hawlaha dhismaha, dib-u-dhiska iyo dayactirka waxay u adeegsataa xafiis hindisaad oo gaar ah (Private)
- Puntland Highway Authority, fulinta hawlaha dhismaha dib-u-dhiska iyo dayactirka waxay u adeegsataa qandaraasley gaar ah (Private)
- Puntland Highway Authority, ku talo gali mayso yeelashada qalabka dhismaha jidadka
- Puntland Highway Authority, waxay dhiirri gelinaysaa adeegsiga nidaamka shaqada gacanta (Labor intensive method), iyadoo la sugayo shuruudaha iyo tilmaamooyinka farsamo iyo tayada
- Puntland Highway Authority, waxay mashaariicda deeqaha kaga qayb galaysaa shaqaale (counter part staff) iyo maaliyad (financial input)

Guddiga sare (BOD) ee hay'addu wuxuu awood u lee yahay wax ka bedelka istaraatiijiyadda hawl-fulineed ee Puntland Highway Authority.

### **Qodobka 6<sup>aad</sup> Mas'uuliyadda guddiga Sare ee hay'adda (BOD)**

guddiga sare wuxuu guud ahaan ilaaliyaa maamulka, iyo hantida wuxuuna awood u lee yahay inuu wax ku saxiixo magaca hay'adda

guddiga sare wuxuu qeexaa siyaasadda guud ee hay'adda wuxuuna dejiyaa shuruudaha hawl-gal

Guddiga Sare ee hay'adda wuxuu awood u lee yahay

- Qeexidda ujeeddooyinka muddada dhow iyo tan dhexe ku aaddan dayactirka iyo horumarinta nidaamka isku-xirka jidadka, iyadoo la cuskinayo siyaasadda D/goboleedka Puntland ee al xiriirta dhinaca gaadiidka (transport sector)
- Ansixinta barnaamijyada iyo istaraateejiyada muddada fog iyo tan dhexe, si loo taabo ujeeddooyinka la qeexay
- Qeexidda nidaamka guud ee dhismaha hay'adda, iyadoo uu qaab-haya'adeedku noqonayo mid ballan qaadaya fulinta barnaamijyada iyo istaraateejiyada la ansixiyey
- Ansixinta siyaasadda guud ee maamulka shaqaalaha, gaar ahaan darajada, nidaamka mushaaraadka, gunnooyinka, wixii dhiirri-gelin ah, shuruudaha shaqo qorista, dallaacadaha, ganaaxa, shaqo ka-fariisinta ee mas'uuliyadaha (key personnel)
- Ansixinta siyaasadda guud ee maalgelinta ee la xiriirta dayactirka iyo horumarinta jidadka
- Ansixinta heshiisyada ku saabsan mas'uuliyadaha barnaamijyada dayactirka jidadka ee maamulada lagu wareejinayo
- Kala-talinta D/goboleedka dhammaan arrimaha la xiriira heerka dakhliga adeeg iyo wax ka badalkooda
- Ansixinta xeerarka maaliyadeed, ogglaanshaha madax-xigayaasha iyo nidaamka xisaabaadka, gaar ahaan hannaanka xisaabaadka ee ganacsiyeysan (commercial accounting system)
- Ansixinta warbixinnada maaliyadeed iyo warbixin-sanadeedka hanti-dhowrka iyo jawaabaha hay'adda fulinta ee ku aaddan warbixinta hanti-dhowrka. Guddiga sare ee hay'adda wuxuu sidoo kale jideeyaa miisaaniyadda Puntland Highway Authority
- Jideynta wareejinta hantida ma-guurtada ah si la socota xeerarka nidaamiya hantida hay'adda
- Soo-jeedinta tirada lacageed oo kabidda (subsidies) ee dowladda laga codsanayo, si loo buuxiyo is-dhinka miisaaniyadda hay'adda

### **Muddada xil haynta guddiga sare waa 2 sano**

Guddiga sare wuxuu awoodihiisa qaarkood u wakiilan karaa guddoomiyaha. Duruufaha degdegga ah wuxuu guddoomiyaha guddiga sare qaadi karaa tallaabo kasta oo ay keento baahida socodka hawlaha hay'adda, iyadoo uu shardigu yahay inuu xubnaha guddiga sare ku wargeliyo shirkooda u soo horreeya

### **Qodobka 7<sup>aad</sup> Shirarka guddiga**

- Guddiga sare wuxuu shiraa 4 jeer sanadkii
- Guddoomiyaha hay'adda fulinta wuxuu dalbi karaa shir aan caadi ahayn ee guddiga sare

### **Qodobka 8<sup>aad</sup> Gunnooyin**

- Xubnaha guddiga haya'ddu waxay xaq u lee yihiin gunnooyinka soo socda: -
  - a) Gunno shirar 200,000/= maalintii
  - b) Gunno safar ee xubnaha aan deganayn goobta shirka oo uu xaddidayo guddoomiyaha hay'adda fulinta

**Qodobka 9<sup>aad</sup>**  
**Mas'uuliyadaha Hay'adda Fulinta**

Qaab-dhismeedka iyo mas'uuliyadaha hay'adda fulinta ee muddada dhexe iyo tan fog waxaa qeexaya oo ansixinaya guddiga sare ee hay'adda

**Qodobka 10<sup>aad</sup>**  
**Maamulka Maaliyadda iyo Hantida**

Maaliyadda iyo hantida Puntland Highway Authority waxaa loo mamulayaa si waafaqsan nidaamka xisaabeed ee Puntland

**Qodobka 11<sup>aad</sup>**  
**Ilaha dakhliga**

10.1 Ilaha dakhli ee Puntland Highway Authority waxay ka imanayaan: -

**A) Jidadka**

1. Adeeg la saaro shidaalka, gaaska iyo olyooyinka dibeda laga keeno
2. Adeeg la saaro gaadiidka, qalabka dayactirka gaadiidka, lugaha baabuurta iyo bateriyaasha

**B) Illo Kale**

1. Adeegga uu qabto laboratoriga
2. Diiwaan-gelinta qandaraasleyda iyo xafiisyada hindisaadda
3. Iibka dokumeentiga qandaraasyada
4. kaalmada farsamo iyo adeegyada hindisaad ee ay hay'addu qabato
5. Kirada qolka shirarka iyo adeegyada la xiriira
6. Diiwaan-gelinta qandaraasyada

11.2 Dhammaan dakhliyada Puntland Highway Authority waxaa ururiya xafiiska dakhli ururinta isagoo u madax-bannaan, iyadoo laga diiwan gelinayo dokumentiga xisaabiyaha guud ee dowladda

11.3 Dhammaan ilaha dakhli ee Puntland Highway Authority waa ka baxsan yihiin miisaaniyadda dowladda dhexe

**Qodobka 12<sup>aad</sup>**  
**Warbixinno**

Warbixinnada maaliyadeed iyo warbixin guud oo ku saabsan hawlaha hay'adda waxaa sanad walba dhammaadkiisa la hor dhigaa dhamman dhinacyada daneeya waxaana lagu daabacaa wargeysyada

**Qodobka 13<sup>aad</sup>**  
**Arrimaha Qaanuuniga ah iyo Garsoorka**

Garyaqaanka guud ee dowladda ayaa arrimaha qaanuuniga ah ee Puntland Highway Authority kala taliya, iyadoo uu isla markaana hay'adda qareen u yahay. Puntland Highway Authority. Waxay markii loo baahdo adeegsan kartaa qareen madax-bannaan (private)

**Qodobka 14<sup>aad</sup>**  
**Dhiirri-Gelin**

Guddiga sare ee hay'addu wuxuu qeexayaa xadka iyo hannaanka dhiirrigelinta maadiga ah ee shaqaalaha

**Qodobka 15<sup>aad</sup>**  
**Diiwaan-Gelinta Qandaraasleyda iyo xafiisyada Hindisaadda ee waddaniga ah**

- 15.1 Dhammaan qandaraasleyda/xafiisyada hindisaadda ee waddaniga ah (local) kana shaqeeya hawlaha Puntland Highway Authority waxaa laga diiwaan geliyaa hay'adda
- 15.2 Habka iyo heerarka diiwaan-gelinta waxaa la waafajinayaa awoodda maaliyadeed iyo farsamo, waxaana dejinaya guddoomiyaha hay'adda fulinta, iyadoo uu ansixnayo guddiga sare ee hay'adda
- 15.3 Qandaraasleyda/xafiisyada hindisaaddu waxay bixiyaan khidmadda diiwaan-gelinta ee uu guddiga sare ee hay'addu jideeyey, si ay u helaan warqadda diiwaan gelinta oo sanadle ah laguna dhaqmi karo 1 janaayo ilaa 3 December ee sanad kasta
- 15.4 Qandaraasleyda/xafiisyada hindisaadda ee la diiwaan geliyey oo keliya ayaa ka qayb geli kara tartanka qandaraaska Puntland Highway Authority
- 15.5 Qandaraasleyda/xafiisyada hindisaadda waddaniga ah waa ka qayb geli karaan tartanka qandaraasleyda ay maalgeliyaan deeq-bixiyaasha xataa haddii ayan Puntland Highway Authority ka diiwaan gashanayn

**Qodobka 16<sup>aad</sup>**  
**Dakhliga Adeeg ee Puntland Highway Authority (Levy)**

- 16.1 waxaa Puntland Highway Authority loo saaray shidaalka dibeda laga keeno dakhli adeeg 15,000/= halkii fuusto
- 16.2 waxaa Puntland Highway Authority loo saary gaaska (Kerosene) dakhli adeeg 2,000/= halkii caag
- 16.3 waxaa Puntland Highway Authority loo saarya olyooyinka iyo xayrta dakhli adeeg 3,000/= halkii kartoon
- 16.4 waxaa Puntland Highway Authority loo saaray gaadiidka, lugaha baabuurta, beteriyaasha iyo qalabka dayactirka gaadiidka ee dibeda laga keeno dakhli adeeg oo u dhigma 15% canshuurtra dowladda u saaran

Saraakiisha kastamada waa inay hubiyaan in adeegga kor ku xusan siduu yahay loo bixiyey




**Qodobka 17<sup>aad</sup>**  
**Dowrka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka**

Wasaaradda hawlaha guud iyo gaadiidka waxay hay'adda horumarinta iyo dayactirka, jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha ee Puntland (Puntland Highway Authority) waxay ku lee dahay ilaalin guud (supervision), iyadoo wasiirku hay'adda u gudbinayo shuruucda iyo siyaasadda dowladda ee ku wajahan jidadka iyo gegooyinka dayuuradaha.

**Qodobka 18<sup>aad</sup>**  
**Dhaqan-Gal**

Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa markii Golaha Wakiiladu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxiixo waxaana lagu saarayaa faafinta rasmiga ah ee dowladda



**C/laahi Yuusuf Axmed Madaxweynaha**  
**D/goboleedka Puntland**

